



Waaladiinta iyo Qoysaska Qaaliga,

Dugsiga Degmada Gobolka DeKalb (DCSD) wuxuu qiimeeyaa xiriir cad oo la heli karo ee ka dhexeeya guriga iyo dugsiga oo waxaa ka go'an inay hubiyaan in dhammaan qoysaska ay helaan warbixin muhiim ah. Waxaan rabnaa inaan kusoo ogeysiino adeegyada turjubaanka ee lagaaga heli karo dugsiga canugaaga.

Adeegyada luuqada xigta ayaa lagu heli karaa:

Adeegyada Turjubaanka ee ay Bixiyaan Dugsiga Degmada Gobalka DeKalb	
Adeegyada Turjubaanka ee loogu talloagalay Kulamada	DCSD waxay siisaa turjubaanada kulamo. Si aad u codsatid turjubaan oo kulanka qorsheysan, fadlan la soo xiriir dugsiga canugaaga kulanka ka hor si aad u codsatid turjubaan.
Turjubaanka Qadka Taleefonka Caawinta DCSD	Shaqaalaha dugsiga waxay galaan Qadka Caawinta DCSD (oo ku yaal Xarunta Baaritaanka Ardayga Caalamiga ah) oo wacitaanada kooban, aan la jadwaleynin, ama xaalada degdega ah.
Turjumaada Dhinaca Taleefonka	DCSD waxay isticmaalaan ELSA Lite App, ELSA Landline, iyo Language Line Solutions si ay ugu bixiyaan helitaanka turjumaada tooska ah ee taleefonka in ka badan 240 luuqadood.
Turjumaad Hal Qaab ah/ Wacitaanada Taleefonka	Haddii macalin ama xubin shaqaalaha dugsiga u baahdo inuu kula soo xiriir si ay kuugu soo gudbiyaan warbixin kooban oo aan qorsheysneyn, waxay codsan karaan turjubaan kaa caawiyo wicitaanka taleefonka ee guriga.
Xiriirka Macalinka	Macalimiinta waxay isticmaalaan codsiyo kala duwan kuwaasoo siiya xiriir maalinle ah waaladiinta iyo qoysaska. Kuwa badan oo barnaamijyadaan ah waxay bixiyaan awooda ay ku siiyaan fariin fasiran. Fadlan kala xiriir macalinka canugaaga wixii warbixin dheeraad ah.

Waxaan aaminsannahay in xiriiriyaha wax ku oolka ah uu muhiim u yahay guusha canugaaga oo wuxuu kugu dhiirogelinayaa inaad isticmaashid adeegyadaan si aad u hubisid inaad xoog ogaal buuxo ka tahay waxbarashada canugaaga.

Haddii aad u baahantahay caawin/hagid dheeraad ah ee ka baxsan dugsiga, fadlan kala xiriir Waaxda Bartayaasha af Ingiriiska **(678) 676-6602**.

Fadlan ka gooy kaarka hoose oo keen dugsiga canugaaga si aad u codsatid turjubaan:



LANGUAGE ASSISTANCE NEEDED

English Learners Department

HELLO! I am a parent/guardian of a DeKalb County School District student and I speak _____.

I need assistance in my native language.

PARENTS OR STAFF: If you have any questions, please call the Interpretation and Translation Unit at **678-676-6602**.